



Soo dhawoow

Ku soo dhawoow maalinta qashin ururinta!

Waxaan Brandkär ka dhigaynaa meel ka sii nadiifsan oo ka sii wanaagsan – **si wadajir ah!**

Iyadoo qayb ka ah hindisaha “*Hela Sverige Plockar Skräp*” (Dhammaan Sweden waxay ururinaysaa qashinka), waxaan Brandkär ku qabanqaabinaynaa maalin qashin ururin ah!



Goorma: 20-ka Sebtembar



Wagtiga: 13:00–16:00



Goobta: Garoonka cawska ee Brandkärskolan

KA QAYBGAL OO GUULEYSO!

Ka qaybgal hawlaha oo hel fursad aad ku guuleysato kaar hadiyadeed oo ka socda ICA Maxi Stormarknad!

Galoofyada, bacaha qashinka iyo agabka kale ayaa goobta laga heli doonaa!

Hawlaha maalinta:

- Qashin ururi oo tijaabi ciyaarteen bingoga qashin ururinta
- Farshaxan ka samee qashinka adiga oo la kaashanaya farshaxanle

Fika (cunto fudud iyo cabitaan) ayaa la bixin doonaa!



Nyköpingshem



Nyköping

Victoriahem